# Barnaamijka Maxaliga ah

## Tilmaamayaasha iyo Walxaha Ka Mid Noqoshada Tayada Sare leh

https://ectacenter.org/topics/inclusion/indicators.asp

*Diseembar 15, 2023*

## TILMAAMAHA L1: Kooxaha Hoggaanka Ka Mid Noqoshada

Barnaamijku waxa uu aasaasaa ama ka qaybqaataa Kooxda Hoggaanka Barnaamijka Ka Mid Noqoshada. Waxay ka kooban tahay maamulayaasha, shaqaalaha barnaamijka, xubnaha qoyska, dadka waaweyn ee naafada ah, iyo shuraakada bulshada kuwaas oo hirgeliya qorshooyin hawleed kuwaas oo hagaya, taageeraaya, oo xaqiijinaya hirgelinta barnaamijyada loo wada dhan yahay iyo dhaqamada loo wada dhan yahay.

**Kooxda Hoggaanka Barnaamijka Ka Mid Noqoshada:**

1. Waxay cilaaqaad la leedahay Kooxda Ku Darida Bulshada (CIT) waxayna si joogto ah macluumaadka ula wadaagta kooxda.
2. Waxay go'aamisaa midka uu yahay shuraakada bulshada ee loo baahan yahay si ay u taageeraan ka mid noqoshada. Shuraakada waa wakiilka barnaamijka (ay ku jiraan tirakoobka carruurta naafada ah ee loo adeego, luqadaha looga hadlo bulshada dhexdeeda, bulshooyinka miyiga) waxay u adeegtaa, iyadoo tixgelinaysa sinjiga, dakhliga iyo luqadda waxaana ku jira shakhsiyaad naafada ah.
3. Waxay horumarisaa oo ilaalisaa heshiisyada barnaamijyada waxbarashada carruurnimada hore (ECE), shuraakada caafimaadka, iyo bixiyeyaasha taageerada habdhaqanka si loo hirgeliyo taageerooyinka iyo adeegyada carruurta naafada ah ee goobaha loo dhan yahay.
4. Waxay leedahay qorshe hawleed ku darida qoraal ah oo leh hadafyo iyo ujeeddooyin la jaan qaadaya ujeeddada ama yool la wadaago, sida kordhinta tirada iyo tayada ka mid noqoshada.
5. Waxay leeyihiin tallaabooyin hawleed lagu aqoonsaday qorshe hawleedka ka mid noqoshada si loo xaqiijiyo hirgelinta guul iyo waaritaanka.
6. Waxay ula kulmaan si joogto ah si ay wax uga qabtaan caddaymaha horumarka laga gaarayo ee ujeedooyinka qorshe hawleedka ka mid noqoshada.
7. Waxay sannadkiiba warbixin ka siiyaan qoysaska iyo bulshada wax ku saabsan horumarka iyo guulaha ka soo xasilay qorshe hawleedka.

## TILMAAMAHA L2: Ujeedada La Wadaago

Barnaamijku waxa uu soo saaraa oo hirgeliyaa bayaanka ujeedada la wadaago oo xaqiijinayaa wax ku biirinta gaarka ah ee dhammaan carruurta. Waxay si gaar ah fiiro gaar ah u siinaysaa carruurta naafada ah iyo kuwa taariikh ahaan iyo wakhti xaadirkan aan si fiican loo daryeelin oo la takooro. Bayaanka waxaa lagu gudbiyaa luqadaha iyo qaababka (tusaale ahaan, qoraal, hadal, ama muuqaal) kuwaas oo sida ugu wanaagsan u daboolaya baahiyaha bulshada deegaanka.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Waxaa uu sameeyaa bayaan ujeedo wadaag ah oo si cad u qeexaya sida loo hirgeliyo ka mid noqoshada iyo abuurista cimilo lagu taageerayo.
2. Waxaa uu isticmaalaa bayaankiisa ujeeddada la wadaago si uu u hago horumarinta iyo isticmaalka siyaasadaha iyo habraacyada taageeraya ka mid noqoshada.
3. Waxa uu xaqiijinayaa in shaqaalaha ay si cad u sharxi karaan bayaanka ujeedada loogu talagalay ku daritaanka carruurta naafada ah iyo qoysaskooda.
4. Waxa uu la wadaagaa bayaanka ujeedada ee ku saabsan ka mid noqoshada wacyigelinta dadwaynaha iyo agabyada barnaamijka ee luuqadaha iyo qaababka ugu habboon oo ay heli karto bulshada.

## TILMAAMAHA L3: Ka-qaybgalka iyo Iskaashiga Qoyska

Barnaamijku wuxuu xaqiijinayaa qoysaska haysta carruurta naafada ah iyo kuwa aan naafada ahayn inay ka qaybqaataan horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo hindisayaasha la xiriira ka mid noqoshada.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Waxay soo saartaa qorshe ku saabsan sida loola macaamilo oo loola shirkooba qoysaska dadaallada u doodista, wacyigelinta dadwaynaha, golayaasha ka mid noqoshada, iyo shirarka. Tan waxaa ka mid ah horumarinta hababka qoysaska marxalad kasta oo horumarinta iyo qiimaynta hindisayaasha ka mid noqoshada.
2. Wuxuu helaa ra'yiga qoyska iyo jawaabcelinta inta lagu jiro hirgelinta qorshe hawleedka ka mid noqoshada.
3. Wuxuu qoysaska siiya macluumaad ku saabsan faa'iidooyinka iyo aasaaska sharciga ah ee ka mid noqoshada.
4. Waxay xaqiijisaa helitaanka agabyada iyo khayraadka loo siman yahay iyadoo la siinayo adeegyo turjumaad bilaash ah; iyadoo la isticmaalayo "dallaalo dhaqameed ama afeed" kuwaas oo taageera qoysaska mara habka aqoonsiga, meelaynta iyo adeegyada; iyo adeegsiga luqadda si fudud loo fahmi karo.
5. Waxa uu qoysaska ku xiraa Xarumaha Tababarka iyo Macluumaadka Waalidka (PTI) iyo barnaamijyada kale ee taageerada qoyska.
6. Wuxuu fursado u abuuraa qoysaska haysta dhammaan noocyada carruurta si ay ula wadaagaan waayo-aragnimadooda ka mid noqoshada.
7. Waxa si joogto ah ugu daraa qoysaska hannaanka horumarinta barnaamijka iyo xalinta dhibaatada.

8. Wuxuu qiimeeyaa waxtarka qorshaha ka-qaybgalka iyo iskaashiga qoysaska.
9. Waxa uu shaqaalaysiiyaa oo si cadaalad ah u magdhabaa qoysaska ay carruurtoodu heleen adeegyada waxbarashada gaarka ah si ay uga caawiyaan qoysaska cusub habka. Shaqaalaysiinta waa in ay ku jirtaa kala duwanaansho ku salaysan luqadaha, dhaqanka, sinjiga, dhaqaalaha, iyo juqraafiga.

## TILMAAMAHA L4: Wacyigelinta iyo Ballanqaadka

Barnaamijku waxa uu leeyahay tilmaamo la taaban karo oo ku aadan ka mid noqoshada kuwaas oo si ula kac ah kor ugu qaadaya wacyigelinta iyo u heelanaanta ka mid noqoshada ee ka dhaxaysa bixiyayaasha, qoysaska, iyo bulshada.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu ururiyaa oo baaraa macluumaad ku saabsan dabeecadaha iyo caqiidooyinka shaqaalaha iyo qoysaska ee ku saabsan ka mid noqoshada wuxuuna bixiyaa fursado lagu aqoonsanayo caqabadaha iyo xalalka.
2. Wuxuu xaqiijiyaa in dhammaan shaqaaluhu si cad u sharxi karaan ayna u muujin karaan sida ay ugu heelan yihiin ka mid noqoshada.
3. Wuxuu xaqiijiyaa in dhammaan shaqaaluhu si cad u sharxi karaan ayna u muujin karaan aqoontooda ku aadan faa'iidooyinka iyo aasaaska sharciga ah ee ka mid noqoshada.
4. Waxay fursado joogto ah oo iswaafaqsan siisaa shaqaalaha si ay ula wadaagaan khibradahooda ka mid noqoshada.
5. Wuxuu ku dabaqaa mabda'a saamiga dabiiciga ah si uu u hago ka mid noqoshada carruurta naafada ah goobaha carruurnimada hore. "Saamiyada dabiiciga ah" waxaa loola jeedaa carruurta naafada ah waa inay ka tarjumayaan saamiga dabiiciga ah ee dadka naafada ah ee bulshada dhexdeeda waana inaan la helin kootada tirada carruurta naafada ah ee loo oggol yahay in lagu diiwaangeliyo adeegyada.

## TILMAAMAHA L5: Siyaasadaha iyo Habraacyada

Barnaamijku waxa uu soo saara oo uuna fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada ka mid noqoshada qoran ee ka tarjumaya bayaankiisa ujeeddada la wadaago iyo taageerida isticmaalka hababka loo wada dhan yahay. Siyaasadaha waxaa lagu heli karaa luqadaha, oo ay ku jiraan luqadda dhegoolaha, iyo qaababka (tusaale ahaan, hadal ahaan, qoraal ahaan, ama muuqaal ahaan) kuwaas oo khuseeya baahida dadweynaha ka tirsan barnaamijka maxaliga ah.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu waalidiinta iyo shaqaalaha siiyaa fursado ay ku bixiyaan habaynta siyaasadda iyo habraaca.
2. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada u hoggaansamaya shuruudaha sharciga ee federaalka iyo gobolka ee adeegyada carruurta naafada ah iyo qoysaskooda.
3. Wuxuu adeegsadaa arrimaha la aqoonsaday ee si aan habboonayn u saameeya Madaw, Laatiinka, Asaliga ah, iyo carruurta kale ee midabka leh ee naafada ah (sida, edbinta, helitaanka barnaamijka laba luqadlaha ah) si loo abuuro siyaasado loo siman yahay oo loogu sheego qorshe hawleed.

4. Wuxuu fuliya siyaasadaha iyo habraacyada lagu shaqo geliyo laguna diiwaangeliyo carruurta naafada ah.
5. Wuxuu xaqiijiyaa in siyaasadaha hadda jira ay ka hortagaan kala soocida ka dhanka ah naafonimada. Siyaasaduhu waxay si cad u qeexayaan in goobaha barnaamijyada kala soocan la aqoonsan doono oo la baabi'in doono iyada oo dib loo meelayn doono maalgelinta lagu taageerayo laguna siiyo khidmadaha ka mid noqoshada, hagaajinta qaabdhismeedka shaqaalaynta, iyo adeegsiga habab kale.
6. Wuxuu horumariyaa hagis loogu talagalay kooxaha barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) ee ku saabsan muhiimada ay leedahay u adeegida carruurta halka lagu adeegi doono haddii aysan lahayn naafonimo.
7. Waxa uu farayaa shaqaalaha in ay si joogto ah u eegaan IEP-ga ubadka si loo hubiyo in adeegyada, taageerada, iyo meelaynta si hufan loo fuliyo.
8. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada taageera dhaqamada loo wada dhan yahay ee carruurta naafada ah iyo qoysaskooda iyadoo leh waxtarka sii kordhaya.
9. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada taageera adeegyada gaarka ah ee wax ka qabta awooda iyo baahiyaha carruurta naafada ah iyo aqoonsiga isgoysyada iyo qoysaskooda.
10. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada xog ururinta si loo hago qiimaynta iyo hagaajinta.
11. Wuxuu si joogto ah dib u eegis iyo cusboonaysiin ugu sameeyaa siyaasadaha iyo habraacyada barnaamijka.

## TILMAAMAHA L6: Khayraadka Maaliyadeed

Barnaamijku waxa uu fahmaa qulqulka maalgelinta la heli karo iyo khayraadka iyo dib u meelaynta, isku dubaridka, iyo lacagaha isku dhafan si loo qaabeeyo loona fuliyo dhaqamada loo wada dhan yahay.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu horumariyaa heshiisyada wada-shaqaynta si ay si hufan oo wax ku ool ah loola wadaago kharashka, isku dhafka, ama maalgelinta lakabka barnaamijyada kale ee ECE.
2. Wuxuu soo saaraa miisaaniyad loogu talagalay shaqaalaysiinta, tababarka, iyo laylinta si ay u taageeraan ka mid noqoshada.
3. Waxaa uu u qorsheeya, kormeeraa, oo qiimeeyaa isticmaalka waxtarka leh ee maaliyadda, shaqaalaha iyo khayraadyada kale si loo taageero dhaqamada loo wada dhan yahay.

## TILMAAMAHA L7: Siyaasadaha iyo Qaab-dhismeedka Shaqaalaha

Siyaasadaha iyo qaabdhismeedka barnaamijku waxa ay taageero siiyaan bixinta EI, waxbarashada gaarka ah, iyo adeegyada kale ee gaarka ah (tusaale ahaan, daawaynta hadalka-luuqada, daawaynta shaqada, ama daawaynta jireed) ee hawl maalmeedka iyo waxqabadyada joogtada ah ee u saamaxaya bixiyayaasha barnaamijka in ay si wada jir ah u ogaadaan oo ay u hirgeliyaan dhaqamada loo wada dhan yahay.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada lagu taageerayo wada shaqaynta ka dhaxaysa barnaamijka iyo shaqaalaha adeegyada khaaska ah inta lagu jiro hawl maalmeedka carruurta naafada ah.
2. Wuxuu aqoonsadaa shaqaalaha isku dubbarida adeegyada qoysaska iyo carruurta naafada ah.
3. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada si loo hubiyo in bixiyeyaasha ay helaan taageerooyinka gaarka ah ee loo baahan yahay iyo khayraadka si ay wax uga qabtaan awoodaha iyo baahiyaha qoyska iyo ilmaha gaarka ah. Fiiro gaar ah ayaa la siiyaa ujeeddada la wadaago ee bixinta qiimaynta jawaabcelinta dhaqameed iyo joogtaynta iyo wax ka qabashada carruurta naafada ah ee leh isdhexgalka jinsiyadda, luqadda, iyo aqoonsiyada dhaqanka.
4. Wuxuu fuliyaa siyaasadaha iyo habraacyada si loo hubiyo in barnaamijka iyo shaqaalaha adeegyada gaarka ah ay si wadajir ah u wada shaqeeyaan si ay ugu dhafmaan adeegyada deegaanka dabiiciga ah iyo hawl maalmeedka oo sare ugu qaadaan waxbarashada midba midka kale.

## TILMAAMAHA L8: Kooxaynta Isbahaysiga

Barnaamijku wuxuu bixiyaa wakhti qorshayn oo ku filan iyo taageerooyin kale oo loogu talagalay kooxaha wada shaqaynta leh si ay si joogto ah ugu wada shaqeeyaan si kor loogu qaado waxbarashada iyo horumarka carruurta naafada ah.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu abuuraa kooxo tacliimo kala duwan leh oo ay ku jiraan shakhsiyaadka wadaaga dhaqanka ama luqadda qoyska si ay uga caawiyaan inay ku taageeraan qoysaska iyo carruurtooda siyaabo dhaqan ahaan u jawaabaya oo sii kobcinayo.
2. Wuxuu dejiyaa qaab-dhismeed shaqaalayn oo ku habboon si loo hubiyo EI, waxbarashada gaarka ah, iyo bixiyeyaasha adeegga la xiriira inay ku taageeri karaan bixiyeyaasha isticmaalka dhaqamada loo wada dhan yahay iyo adeegyada la dhexdhigay si ay u daboolaan baahiyaha carruurta naafada ah iyo qoysaskooda.
3. Wuxuu dejiyaa qaab-dhismeed shaqaaleysiin dabacsan iyo jadwalayn si loogu oggolaado waqti lagu kulmo, lagu qorsheeyo, iyo xalinta dhibaatada.
4. Wuxuu si joogto ah dib u eegis iyo qiimayn ugu sameeyaa waxtarka ay leedahay wada shaqaynta.
5. Wuxuu bixiyaa hagitaan gaar ah oo ku saabsan sida loo qiimeeyo DLL-yada looga shakisan yahay naafonimada luqaddooda hooyo iyo Ingiriiska, iyadoo la isticmaalayo turjubaano ama bixiyeyaasha laba luqadle ah haddii loo baahdo. Wuxuu bixiyaa hagis ku saabsan sida loo bixiyo fursado waxbarasho oo loo wada dhan yahay oo kobciya laba-luqadlaha iyo horumarka guud ee ubadka xitaa marka bixiyayaasha aysan ku hadlin luqadda hooyo ee ilmaha.

## TILMAAMAHA L9: Kaalmada Farsamo ee Gaarka ah iyo Adeegyada La-talinta

Barnaamijku waxa uu aqoonsadaa oo helaa kaalmada farsamo ee khaaska ah (TA) iyo adeegyada la-talinta si loo taageero hirgelinta dhaqamada loo wada dhan yahay oo uu la xiriiro gobolka wixii taageerooyin dheeraad ah. Macluumaadka ku saabsan TA iyo adeegyada la-talinta ayaa lagu soo bandhigaa qaabab iyo luqado khuseeya oo buuxinaya baahida barnaamijyada.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu ka dhigaa bixiyayaasha inay ka warqabaan TA iyo taageerada gobolka iyo deegaanka ee la heli karo.
2. Wuxuu ka ururiyaa macluumaadka bixiyayaasha TA dheeraadka ah iyo adeegyada la-talinta ee loo baahan yahay. Macluumaadka waxaa la soo ururiyaa iyadoo la isticmaalayo qaabab kala duwan, oo ay ku jiraan kooxaha diiradda, sahanka, iwm.
3. Wuxuu soo saaraa qorshe lagu heli karo adeegyada TA ee la heli karo.
4. Wuxuu u gudbiyaa baahida loo qabo taageerooyinka dheeraadka ah ee Kooxda Isku-Darka Bulshada (CIT) ama gobolka sida ku habboon.
5. Wuxuu dejiyaa qorshe loogu talagalay dhammaan bixiyayaasha si ay isaga kaashadaan, u qorsheeyaan, oo ay u xaliyaan dhibaatada shaqaalaha adeegyada gaarka ah.
6. Wuxuu isticmaalaa xog si uu u qiimeeyo waxtarka TA iyo adeegyada la-talinta.
7. Wuxuu aqoonsadaa oo ilaaliyaa helitaanka TA ee wax ka qabta sinaanta waxbarashada gaarka ah. Kaalmada farsamada ayaa si gaar ah uga mid ah mawduucyada la xiriira isgoysyada u dhexeeya sinjiga, luqadda, iyo naafonimada, iyo sida si wax ku ool ah ee loo qiimeeyo oo loo bixiyo adeegyada carruurta DLL-yada ee looga shakisan yahay ama loo aqoonsaday naafo.
8. Aqoonso adeegyada la-talinta ee ay bixiyaan khubarada xubnaha ka ah bulshada loo adeegayo.
9. Wuxuu barnaamijyada ku aqoonsadaa in uusan helin TA wuxuuna ku fuliya barnaamijyadaas.

## TILMAAMAHA L10: Taageerada Barnaamijka ee Horumarinta Xirfadlayaasha

Barnaamijku waxa uu dhisaa kalsoonida iyo kartida bixiyaha ee fulinta dhaqamada loo wada dhan yahay. Waxay siisaa fursado iyo taageerooyin si ay ugu lug yeeshaan horumarinta xirfadeed (PD) iyo laylinta kor u qaadaysa sinnaanta.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu si nidaamsan u qiimeeyaa awoodaha iyo baahiyaha bixiyayaasha ee la xiriira isticmaalka hababka loo wada dhan yahay.
2. Wuxuu horumariyaa hanuuninta iyo fursadaha horumarinta xirfadeed ee joogtada ah kaas oo wax ka qabta isgoysyada u dhexeeya sinjiga, kartida iyo luqadda.
3. Wuxuu bixiyaa taageerada lagama maarmaanka ah si loo isticmaalo dhaqamada loo wada dhan yahay, sida tababarka ku salaysan ku dhaqanka iyo la-talinta bixiyeyaasha.
4. Waxay siisaa wakhtiga siideynta iyo khayraadka bixiyayaasha si ay ugu lug yeeshaan si macno leh, joogta ah, PD iyo laylin.

5. Wuxuu qiimeeyaa waxtarka PD iyo saamaynta ay ku leedahay qaadashada iyo isticmaalka dhaqamada loo dhan yahay.
6. Waxa uu leeyahay hab lagu bixiyo PD si ay u taageerto bixiyeyaasha cusub ee la shaqaaleysiiyay.
7. Wuxuu xaqiijiyaa in TA ama PD lagu heli karo (si bilaash ah ama lacag jaban, saacadaha dabacsan ama inta lagu jiro maalmaha PD, qaabab iyo luqado kala duwan marka ay munaasib tahay) oo uu buuxiyo baahiyaha barnaamijka.
8. Wuxuu xaqiijiyaa in xogta natiijada ilmaha loo isticmaalo si loo go'aamiyo waxa ku jira TA ama PD, iyadoo la waafajinayo baahiyaha bixiyaha.
9. Wuxuu xaqiijiyaa bixiyeyaasha inay helaan PD oo diiradda saaraya adeegsiga dhaqamada loo wada dhan yahay, oo leh tababaro shaqo ku xiran iyo wareegyo jawaabcelin ah.

## TILMAAMAHA L11: Manhajka

Barnaamijku wuxuu si wax ku ool ah u isticmaalaa manhaj ku habboon korriinka kaas oo loo habeeyey hadba sidii loogu baahdo. Waxay carruurta naafada ah siisaa waayo-aragnimada ka mid noqoshada taas oo korinayso waxbarashadooda, wakaaladdooda, iyo isdhexgalkooda bulsheedba.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu hirgeliyaa manhaj la qabsan kara awoodaha iyo baahiyaha carruurta naafada ah.
2. Wuxuu bixiyaa tababbarka bixiyaha ee ku saabsan sida loola qabsado, loo haayo, waxna looga bedello manhajka si loo daboolo baahiyaha carruurta naafada ah.
3. Wuxuu xaqiijiyaa in bixiyayaasha ay fahmaan oo ay ku dabaqi karaan mabaadi'da naqshadaynta caalamiga ah ee barashada hab-dhaqannada, agabka, iyo bay'ada waxbarashada dabacsan oo la heli karo.
4. Waxaa ku jira taageerada manhajka ee loogu talagalay DLL-yada naafada ah si loo hubiyo inay helayaan taageerada guud ee horumarinta iyo waxbarashada taasoo kobcisa horumarinta Ingiriiskooda iyo luqaddooda hooyo.
5. Bixiyeyaasha waxay helayaan khayraad iyo hagitaan ku saabsan manhajka kaabista agabyada, alaab-ciyaareedka, iyo buugaagta matalaya kala duwanaanshaha hodanka ah (sinjiga, dhaqanka, luqadda, iyo kartida) carruurta iyo qoysaska loo adeego.
6. Bixiyeyaasha waxay helayaan hagitaan ku saabsan sida loogu dhejiyo fursadaha waxbarasho ee gaarka ah ee carruurta naafada ah manhajyada jira.

## TILMAAMAHA L12: Aruurinta iyo Isticmaalka Xogta

Barnaamijku wuxuu adeegsadaa xogta la kala soocay, (sida, sinjiga iyo qowmiyadda, luqadda, kartida, jinsiga, dakhliga, gobolka juquraafiyadeed), kormeer joogto ah, iyo qiimayn saafi ah si loo sameeyo go'aamo loona hagaajiyo tayada la xiriirta deegaanka, dhaqamada loo dhan yahay, iyo khibradaha ilmaha.

**Barnaamijka maxaliga ah:**

1. Wuxuu ururiyaa xog si loo sameeyo go'aano xog ogaal ah oo ku saabsan hirgelinta dhaqamada loo wada dhan yahay, iyadoo la heli karo in lagu eego xogta isgoysyada (tusaale ahaan, sinji × naafonimo, sinji × naafonimo × luqadda hooyo).
2. Wuxuu adeegsadaa xog ilo badan laga soo xigtay si loo go'aamiyo caqabadaha ka mid ahaanshaha (tusaale ahaan, takoorka kartida, siyaasada ama khayraadka, korriinka xirfadeed, isku-dubarid la'aan).
3. Wuxuu si nidaamsan u ururiyaa, u falanqeeyaa, oo u adeegsadaa xogta la kala saaray ee la xiriirta:
    - Tirada kuraasta ama boosaska ay heli karaan carruurta naafada ah barnaamijkeeda dhexdiisa.
    - Tirada carruurta ee naafada ah ee ku jira liiska sugitaanka ee barnaamijka.
    - Natiijooyinka korriinka ee ku aadan carruurta naafada ah.
    - Ku qanacsanaanta bixiyaha iyo fikradaha ka mid noqoshada.
    - Dareemada bixiyaha ee kartida iyo kalsoonida lagu daro carruurta naafada ah.
    - Ku qanacsanaanta qoyska iyo fikradaha ka mid noqoshada.
    - Tirada carruurta helaysa wax ka qabashada hore, waxbarashada gaarka ah, iyo adeegyada la xiriira deegaanka loo dhan yahay ee barnaamijkeeda dhexdiisa.
4. Wuxuu siiya xogta ka timaada tilmaamayaasha barnaamijka Kooxda Ku Darista Bulshada (CIT) iyo wakaaladaha gobolka hadba sida loogu baahdo.
5. Wuxuu adeegsadaa Tilmaamaha ka mid noqoshada Daryeelka Hore iyo Deegaanka Waxbarashada (ECEE).
6. Wuxuu bixiyayaasha, qoysaska, dhinacyada ay khusayso, iyo barnaamijyada kale ee ECE siiya xog kooban oo joogto ah oo qaab-saaxiibtinimo leh.
7. Wuxuu si jadwalaysan oo joogta ah u qiimeeyaa waxtarka hababka xog ururinta.
8. Xogta DLL-yada naafada ah waxaa ka mid ah sahanka luqadda guriga, iyo xogta ku qoran af Ingiriiska iyo luqaddooda hooyo, sida ku habboon. Marka bixiyeyaasha aysan ku hadlin luqadda hooyo ee carruurta, turjubaannada ama xubnaha bulshada ayaa loo adeegsadaa si ay u ururiyaan macluumaadka ku saabsan horumarka carruurta iyo dadaalka labada luqadood.

**Xigashada la soo jeediyay:**

Xarunta Kaalmada Farsamo ee Carruurnimada Hore, & Xarunta Qaranka ee Hal-abuurka Qaabka Ahraamta (2023). *Tilmaamayaasha ka Mid Noqoshada Tayada Sare*. Laga soo celiyay https://ectacenter.org/topics/inclusion/indicators.asp

Nuxurada ku qoran boggan waxaa lagu soo saaray si waafaqsan heshiisyo iskaashi #H326P220002 (Xarunta ECTA) iyo #H326B220002 (NCPMI), ka socda
Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah, Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. Si kastaba ha noqotee, nuxurada ku qoran daruuri ma ahan inay matalaan siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, mana aha inaad u qaadato inay oggolaatay Dawladda Federaalka.

IDEAs that Work
Office of Special Education Programs
U.S. Department of Education

UNC
FPG CHILD DEVELOPMENT INSTITUTE